









Fasaxyadii lala joogay ayeyyo


-  Violet Otieno
-  Catherine Groenewald
-  Abdi Muse
-  4
-  Soomaali



Odongo iyo Apiyo waxay kula noolaayeen magaalada aabahood. Waxay sugayeen fasaxyada. Ma aha sababti la iskuulka la xidhay, laakiin waxay u doonayeen in ay soo booqdaan ayeeyadood. Waxay ku nooleed tuulo kalluumeyysi oo u dhaw laag ballaaran.



Odongo iyo Apiyo way faraxsanayeen sababtoo ah waxa ay ahayd wakhtigii ay soo booqan lahayeen ayeeyadood. Habeen ka hor, ayay xidhxidheen waxayna u diyaar garoobeen safarka dheer ee tuuladeeda. Way seexan kari waayeen, waxayne ka shekeysten habeenkii oo dhan fasaxa.



Aroortii hore ee subixii xigay, waxay ka tageen tuulada wxayne raaceen baabuurki aabbahood. Waxay sii mareen buuro, xayawaanka duurjoogta ah iyo beeraha caleen shaaha. Waxay tiriyeen baabuurta iyagoo ku heesayo heeso.



Muddo ka dib, carruurtii way daaleen hudo ayayna la dhaceen.



Aabahood ayaa toosiyey Odongo iyo Apiyo markii ay yimaadeen tuulada. Waxay heleen Nyar-Kanyada, ayeeyadood, iyadoo ku fadhida darin geed hoostiisa. Nyar-Kanyada Luo ahaan, waxaa loola jeedaa “gabadhii reer Kanyada”. Waxay ahayd haweeneey xoog leh oo qurux badan.




Nyar-Kanyada waxay ku soo dhaweysay guriga waxayna ku niikiyen qolka iyagoo ku wareegayo oo u heysayo si farxad leh. Carruurta ay ayeeyada u tahay waxa ay ahaayeen kuwo ku faraxsan in ay iyada siiyaan hadiyayd ay kasoo gadeen caasimada. "Marka hore fur hadiyaddayda," ayuu yidhi Odongo. "Maya, hadiyaddayda marka hore!" ayeey tiri Apiyo.



Ka dib markii ay furtay hadiyadaha, Nyar-Kanyada ayaa u ducaysay caruurta ayeeyada u aheyd si hab dhaqameed ah.



Dabadeed Odongo iyo Apiyo ayaa banaanka u baxay. Waxay caydh caydhsadeen balan baalis iyo shimbiro.



Waxa ay fuuleen geedaha waxayna firfirdhiyeen biyaha laagta.



Marku uu mugdi galay waxay kusoo laabteen guriga si ay u casheeyaan. Ka hor inta aysan dhamaysanin cuntada, hurdey ayay la dhaceen!



Maalintii xigtay, caruurta aabahood ayaa dib ugu laabtay magaalada iyagana uga tagay Nyar-Kanyada.



Odongo iyo Apiyo waxay ka caawiyeen ayeeydood shaqada guriga. Waxay u soo dhaamiyeen biyo waxayne u soo gureen xaabo. Waxay soo uruureen ukumo iyo caws ooy kasoo aruuriyeen digaaga iyo beerta.



Nyar-Kanyada waxay bartay caruurtay ayeeyada u tahay sida loo kariyo soor jilicsan si ay ugu cunaan fuudka. Waxay tustay sida loo sameeyo bariiska qumbaha si ay ugu cunaan kalluunka duban.



Hal Subax, Odongo waxuu kaxeeyay sicihii ayeeydiis si ay u soo daaqaan. Waxay ku ordeen beertii deriska. Beeraalihii wuxuu u xanaaqay Odongo. Waxa uu ku hanjabay in uu ilaaliyo lo'da cunaayo dalagiisa. Maalintii ka dib, wiilku wuxuu ku dadaalay in lo'du aanay mar kale dhibaato ka soo gaarin.



Maalin kale, carruurtu waxay suuqa u raaceen Nyar-Kanyada. Waxay laheyd sandaqad ay ku iibiso khudaarta, sonkorta iyo saabuunta. Apiyo waxay jeclayd in ay u sheegto macaamiisha qiimaha alaabta. Odongo wuxuu u soo hagaajiyaa alaabta ay macaamiisha iibsadeen.



Dhammaadkii maalinta waxay wada cabbeen shaah. Waxay ka caawiyeen ayeeyadood tirinta lacagta ay heshay.



Laakiin si dhakhso ah ba fasaxyada waa ay dhammaadeen caruurtana waxa ay ahayd iney ku laabtaan magaalada. Nyar-Kanyada waxay siiyey Odongo koofiyad Apiyo na funaanad dhaxameed. Waxay u diyaarisay cunto safarkooda.



Markii aabbahood u yimid in uu wado, ma aysan doonayn in ay baxaan. Carruurta waxa ay baryeen Nyar-Kanyada in ay u raacdo magaalada. Way dhoola cadaysay oo waxay tiri: “Aad ayaan u weynahay in aan magaalada aado. Waxaan sugayaa in aad mar kale iigu imaataan tuuladayda.”



Odongo iyo Apiyo labadoodaba waxay si adag hab usiiyeen ayeeyadood waxayna yiraahdeen nabad galyo.



Markii Odongo iyo Apiyo ay dib ugu noqdeen iskuulki waxay u sheegeen saaxiibadood nolosha tuulada. Carruurta qaarkood waxay dareemeen in nolosha magaalada ay wanaagsantahay. Qaar kale waxay dareemeen in tuuladu ay ka fiicantahay. Laakiin badankood, waxay isku raaceen in Odongo iyo Apiyo ay lahaayeen ayeeyo wanaagsan!



Global Storybooks

globalstorybooks.net

Fasaxyadii lala joogay ayeyyo

 Violet Otieno

 Catherine Groenewald

 Abdi Muse

